

KALAGUURKA: Tallaabada Xigta

MAXAA DHACAYA MARKA ILMAHAYGU
NOQDO SADDEX SANO JIR?



Hagaha Kalaguurka ee Adeegyada Barbaarinta Caruurta ee kujira Individuals With Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah, IDEA) Qaybta C.

Barnaamijka waxa maalgaliyay Gobolka Washington Department of Children, Youth, and Families, Early Support for Infants and Toddlers Program (Waxda Caruurta, Dhalinyarada iyo Qoysaska, Kaalmaynta Caruurta Naafada ah iyo Socod baradka).



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Waa maxay kalaguurku?

Marka ilmahagu uu noqdo saddex sano jir, dhammaadka adeegyada barbaarinta caruurta iyo adeegyada cusub iyo taageerooyinka la heli karo. Nidaamkan isbadal waa mid kamid ah kalaguuro badan kaasoo ku dhici doona ilmahaaga iyo guud ahaan nololsha qoyskaag.

Lix ilaa sagaal bilood kahor dhalashada ilmahaaga, waxaad bilaabi doontaa la shaqaynta family resources coordinator (agaasimaha khayraadka qoyska, FRC) oo kooxdaaduna waxay qorshaynayaan adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga barbaarinta ama adeegyada kale ee loo baahan yahay iyo taageerooyinka. Qoysaska iyo bixiyeyaasha adeega waxay si wadajir ah u maraan nidaamkan kalaguur u horseedayada kulanka kala guurka.

Maxay tahay ujeedada shirka kalaguurka?

Inta lagu gudo jiro Individualized Family Service Plan (Qorshaha Qoyska ee Shaqsiga ah, IFSP) Kulanka, qorshaha kalaguur oo qoran ayaa idinka iyo kooxdaada wax-ka-qabashada hore idiin diyaarin doona si ay kaaga caawiyaan habraaca kala guurka.

Individuals with Disabilities Education Act (Xeerk Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah, IDEA) Qaybta C waxay u baahan tahay qorshe qoran oo ku saabsan kalaguurka ka hor dhalashadiisa saddexaad ee ilmahaaga.

Goorma ayaan bilaabaynaa qorsheynta kalaguurka?

Lix ilaa sagaal bilood ka hor dhalashadiisa saddexaad ee ilmahaaga:

Qorshaynta kalaguurka ayaa bilaabmaya. FRC-gaagu waxay fududayn doontaa xidhiidhka idinka dhexeeya adiga iyo degmadaada ama barnaamijyada kale ee bulshada ku salaysan si aad u bilawdo qorshaynta ubadkaaga marka uu sadex jirsado.

Ugu yaraan saddex bilood ka hor dhalashadiisa saddexaad ee ilmahaaga, kulanka qorshaynta kala guurka ayaa la qaban doonaa:

Waxaad la kulmi doontaa wakiilka degmada dugsiga taasoo qayb ka ah kulanka. Waxay kuu sharxi doonaan waxa dhici doona si loo go'aamiyo haddii ilmahaagu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga barbaarinta.

Haddii ilmahaagu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga, sida ay go'aamisay degmadu, adeegyada waxa lagu bixin doonaa iyada oo loo marayo Individualized Education Program (Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiga ah, IEP).

Kulan lala yeelanayo wakiilka dugsiga degmada lama ballansan doono haddii aadan rabin inaad hesho adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga barbaarinta.

Waa maxay qorshaha kalaguurku?

Qorshaha kalaguurka ayaa tilmaamaya sida, FRC-gaaga, iyo kooxdaada barbaarinta caruurta ayaa ka caawin doona ilmahaaga iyo qoyskaaga u gudbaan adeegyada barbaarinta caruurta ee dada saddex sano. Qorshuhu wuxuu qeexayaa waxa taageerooyinka, tallaabooyinka iyo adeegyada loo baahan doono marka ilmahaagu galo dugsiga degmadaada barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee dugsiga barbaarinta ama adeegyada kale ee bulshada ku salaysan, ama ka tago taageerada iyo adeegyada sababtoo ah ilmahaagu hadda kuma habboona.

Maxaa u xiga ilmahayga?

Samaynta qorshaha kalaguurka ee ilmahayga:

Adiga iyo kooxda barbaarinta caruurta ayaa ka wadashaqayn doona inay sameeyaan qorshe. Kooxda waxa kujira adiga, FRC-gaaga, dadka hadda la shaqeeyaa ilmahaaga, shaqsiyaadka kale ee aad rajaynayso in ay ku luglaadaan iyo dadka laga yaabo in mustaqbalka ay ku lug lahaadaan ilmahaaga. Kooxdu waxay eegi doonaan horumarka ilmahaaga iyo baahiyaha jira. FRC waxay iskuxidhi doontaa samaynta qorshaha kalaguurka.

Waa maxay adeegyada loo heli karo ilmahayga ka dib kalaguurka da'da saddex jirka?

Taasi waxay ku xidhan tahay haddii ilmahaagu u baahan yahay adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga barbaarinta. Dugsiga degmadaada ayaa go'aamin doonta haddii u ilmahaagu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga barbaarinta. Haddii ilmahaagu u qalmo, adeeyo kala duwan ayaa laga yaabaa in la heli karo, sida barnaamijka bulshada, Head Start, Early Childhood Education and Assistance Program (Waxbarashada Barbaarinta Caruurta iyo Barnaamijka Caawinta, ECEAP), ama barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee dugsiga barbaarinta. Waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha waxa lagu bixin doonaa iyadoo loo marayo IEP. FRC waxay iskuxidhi doontaa kulanka qorshaha kalaguurka. Dugsiga degmadu wuxuu abaabuli doonaa kulanka samaynta IEP-ga ilmah.

Waxaad codsan kartaa in FRC-gaaga lagu casuumo kulanka IEP. Waxaad soo kaxaysan kartaa saaxiib, xubnaha qoyska ama xubin kale oo bulshada ah oo aad doorato si ay kaaga taageeraan kulanka IEP. Haddii aad haysato maamulaha kiiska Developmental Disabilities Administration (Maamulka Horumarinta Naafada, DDA) ama agaasimaha Children with Special Health Care Needs (Caruurta Baahiyaha Gaarka ah ee Caafimaad qaba, CSHCN), waad soo caasuumi kartaa iyagana sidoo kale. Kulanka IEP waa inuu dhacaa ka hor dhalashadiisa sadexaad iyo IEP waa inuu jiraa marka la gaadho dhalashadiisa sadexaad. Kulamada IEP ayaa la qorsheeyaa sanadkiiba mar. Si kastaba ha ahaatee, waxaad codsan kartaa kulan IEP ah wakhti kasta adiga ama shaqaalaha dugsiga aad dareentaan inay jirto baahi aad uga wada hadashaan barnaamijka ilmahaaga.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu aanu u qalmin adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga barbaarinta?

Haddii ilmahaagu aanu u qalmin adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga barbaarinta, FRC-gaadu waxay kaala shaqayn doontaa sidii loo aqoonsan lahaa fursadaha kale ee suurtoogalka ah ee u diyaarsan ilmahaaga, sida Head Start, ECEAP ama barnaamijyada kale ee bulshada.

Waa maxay doorka aan ku leenahay geedi socodka kalaguurka?

Talooyin ku saabsan sida aad uga caawin karto ilmahaaga iyo qoyskaaga inay sameeyaan isbeddel fudud:

- Ka qaybgal shirarka adiga oo ka hadlaya waxaad u rabto ilmahaaga.
- Qoraal ka qaado shirarka.
- Baadh ilaha iyo adeegyada.
- Hayso buug qoraal ah oo ku saabsan dhaqdhaqaaqyada iyo danaha ilmahaaga. Ku dar warqadda dhalashada ilmahaaga, diiwaanka tallaalka, warbixinnada caafimaadka, sawirrada, qiimaynta, qiimaynta, iyo IFSP hore. Sawirada ilmahaagu waxay caawiyaan shakhsiyaynta xaqiiqooyinka iyo macluumaadka.
- Waa maxay waxyaabaha caawin kara si loola taliyo ilmahaaga? Waxaad ogaan kartaa baahiyihisa/baahiyaha. Ogow waxa laga filayo ilmahaaga oo la shaqee dugsiga degmada iyo kooxda IEP si aad u hesho adeegyada ilmahaaga.

Maxay yihiin tallaabooyinka xiga ee kalaguurka ka dib?

Weydii haddii ay jiraan koox taageero qoys, local Parent Teacher Student Association (Ururka Ardayda iyo Macallimiinta Maxalliga, PTSA) ama Special Education Parent Advisory Council (Golaha Latallinta Waalidka ee Waxbarashada Gaarka ah, SEPAC) ee degmadaada. Waydii haddii degmadu leedahay shaqaale adeega qoyska, shaqaale bulsho, ama cilmi-nafsiga dugsiga kaas oo ku caawin kara haddii aad wax wel-wel ah qabto. Xasuusnoow in adigu, waalid ahaan, laga yaabo in aad ka faai'adaysato taageerada nafsadaada, iyo sidoo kale ilmahaaga, marka qoyskaagu u gudbayo habka kalaguurka.

Waa maxay macluumaadka kale ee aan u baahanahay inaan ogaano?

Haddii ilmahaagu hadda u qalmo adeegyada DDA, u-qalmitaanka adeegyada waa in dib loo go'aamiyaa ka hor inta aanu ilmahaagu gaadhin afar sano. Waa muhiim inaad la wadaagto qiimaynta barbaarinta caruurta, macluumaadka kalaguurka iyo warbixinta qiimaynta dugsiga degmada inta lagu jiro nidaamka kalaguurka ee DDA. **Oggolaanshahaaga siidaynta macluumaadkan DDA waxa laga heli karaa dugsiga degmada kulanka qorshaynta kalaguurka.** Haddii macluumaadka lagu go'aaminayo u-qalmitaanka ilmahaaga in aanu ku habboonayn, ilmahaaga waa laga saarayaa adeegyada DDA marka uu jiro afar sano.

Halkeen aan kaheli karaa caawimo ama macluumaad dheeraad ah?



Department of Children, Youth & Families Early Support for Infants and Toddlers (Waaxda Dhalinyarada & Qoysaska ee Kaalmaynta Caruurta Yar-yar iyo Kuwo Raadqaadka ah, ESIT) barnaamijku wuxu hagayaa nidaamka IDEA ee gobolka guud ahaan Qeybta C ee adeegyada barbaarinta caruurta.

esit@dcyf.wa.gov
www.dcyf.wa.gov

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo gudbin ahba u wareeji family resources coordinator (agaasimaha khayraadka qoyska, FRC) kala xidhiidh Help Me Grow Washington magaca FRC ee goobtaada maxalliga ah.

1-800-322-2588

Shabakada Aabayaasha Gobolka Washington ee Xarunta Barbaarinta. Latallinta iyo siinta taageerada iyo khayraad guud ahaan dadkoo dhan iyo qoysaskooda kuwasoo haysta caruurta qabta baahiyaha gaarka ah.

(425) 653-4286

www.fathersnetwork.org

PAVE waa xarunta tababarka waalidiinta ee gobolka oo dhan oo bixisa caawinta qoysaska haysta caruur naafo ah, da'da dhalashada ilaa qaangaadhnimada.

1-800-572-7368 (800-5 PARENT)

www.wapave.org

Waalidka Gobolka Washington waa shabakad waalid oo gobolka oo dhan ah oo bixisa taageero shucuureed iyo macluumaadka waalidiinta haysta carruurta naafada ah ama dib u dhaca korriinku ku dhacay.

1-800-821-5927

www.arcwa.org/parent-to-parent

Goobada Gobolka Washington waxay kor u qaadaa waxbarashada, caafimaadka, isku filnaanta, latallinta, ka mid noqoshada, iyo doorashooyinka shaqsiyaadka naafada koriinka leh iyo qoysaskooda.

1-888-754-8798

www.arcwa.org

Office of Superintendent of Public Instruction (Xafiiska Maamulaha Tilmaamaha Dadwaynaha) waxay leedahay wabsaayt waxtar leh oo loogu talagalay qoysaska carruurta leh ee ka hela waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha: www.K12.wa.us/SpecialEd/Families/default.aspx

Gobolka Washington Department of Children, Youth & Families Early Support for Infants and Toddlers (Waaxda Dhalinyarada & Qoysaska ee Kaalmaynta Caruurta Yar-yar iyo Kuwo Raadqaadka ah)

PO Box 40970

Olympia WA 98504-0970

esit@dcyf.wa.gov

www.dcyf.wa.gov/services/child-development-supports/esit

Takoorku waa ka mamnuuc dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha. Qofna lagama saari karo iyadoo loo eegayo isir, midab, diin, caqiido, asal halka uu kasoo jeedo, lab iyo dhedig, da' ama naafanimi.

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qaybaha) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION FS_0004 | DEL 11-013 SM (07-2023) Somali